Somali

Maine Medical Center
MaineHealth

Siyaasadda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka

SIYAASADDA **SIYAASADDA DARYEEL BILAASH AH**

UJEEDADA:
Waa siyaasadda xubin nimada MaineHealth (MH) in la siiyo kaalmo dhaqaale bukaanada u qalma iyadoo loo marayo tilmaamaha ku cad dokumentigan. Sida Sharciga Maine dhigayo, ma jiro cusbitaal u diidi kara adeegyada cid deggan Maine iyadoo lagu salaynayo in qofku kharashka adeegyada aanu iska bixin karin. Cusbitaal kasta waxa looga baahan yahay inuu la qabsado oo uu adeeco siyaasadda daryeel bilaash ah taasi oo taageeraysa go'aanka iska bixin kari waaga, uu qeexa adeegga lagu bixinayo bilaa lacag, uuna tixgeliyo meelo kale oo lacagta daryeelka laga bixin karo, si waafaqsan heerarka ku qoran Cutubka 150 ee xeerarka xukuma Waaxda Maine ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha, Xafiiska Adeegyada MaineCare.

MaineHealth waxay hirgalisay siyaasadda soo socda iyadoo eegaysa Daryeel Bilaash in laga helo dhammaan bixiyayaasheeda.

SIYAASADDA:

I. TILMAAMAHA DAKHLIGA

A. **Qeexidmaha** Ujeedooyinka Cutubkan dartii, qeexdimaha soo socda ayaa khusayn doona:

(1) **Qoyska.** Qoysku waa koox dad ah oo ka kooban laba ama ka badan oo dhalasho, guur ama korsi xidhiidhay kuwaasi oo meel ku wada nool oona ay jirto masuuliyad sharci xagga taageerada; dhammaan dadkan wax isku ah waxaa loo tixgaliyaa hal qoys. (Haddii qoys uu ka kooban yahay hal qoys wax ka badan iyo/ama wax ka badan hal qof oo ayna waxba isku ahayn, tilmaamaha dakhligu waxay u kala khusaynayaan si gaar ah qoys kasta iyo/ama qofka aan waxba la isku ahayn, mana noqonayaan qoys kaliya.)

a) Sida siyaasaddan dhigayso, lammaanaha isla nool oona diiwaangashan waxaa loo tixgaliyaa hal qoys.

(2) **Qoyska Halka Qof** Marka la eego tilmaamaha dakhliga, qoyska halka qof waa qof ayna qoyska kale waxba isku ahayn, taasi oo ka dhigan, qof ah 15 jir ama ka wayn kaasi oo la noolayn wax qaraabadiisa ah. Qofka ayna cidna waxba isku ahayn wuxuu noqon karaa qof kaliya ee guriga deggan, ama wuxuu noqon karaa ka kaliya ee ku nool guriga (ama koox

meel wada deggan sida guri lagu wada nool yahay si gooni gooni ah) kaasi oo qof ama ka badan uu sidoo kale ku nool yahay kaasi oo ayna waxba isku ahayn xagga dhalashada, guurka, ama korsiga qofka laga hadlayo.

(a) Sida siyaasaddan dhigayso, ardayda qaangaarka ah (18 ama ka wayn) waxa loo tixgaliyaa qoys qof ka kooban, xiitaa haddii ay wali la nool yihiin waalidiintooda.

(3) **Dakhliga** Dakhliga macnihiisu waxa weeye wadarta lacagta sanadkii qofka soo gasha kahor cashuurta meesha ay doontaba ha ka soo gasho eh marka laga reebo sida ku cad baaragaraaf-yaraha (b) ee hoose.

(a) Dakhliga waxa kamid ah:

(i) mushaharka guud ahaan kahor inta aan waxba laga jarin,

(ii) wixii qofka ka soo gala wixii aan beer ahayn ama beer uu isagu ka shaqaysto ah (wixii qofka ka soo gala ganacsigiisa ama beer uu leeyahay ama kiraystay kadib markii laga jaro kharashka ganacsiga ama beerta);

(iii) lacagaha caadiga ah ee ka soo gala sooshiyaal sikiyuuritiga, hawlgabka jidka tareenka, magdhawga shaqo la'aanta, magdhawga shaqaalaha, dheefaha shaqo-joojinta ee ururada shaqaalaha ka yimaadda, dheefaha halgamaaga hore;

(iv) lacagaha kaalmada dadwaynaha oo ay kujiraan Kaalmada Kumeel Gaadhka ah ee Qoysaska Baahan, Dakhliga Ammaanka Kabka, iyo Kaalmada Guud;

(v) lacagaha tabobarka

(vi) biilka, taageerada ilmaha, qoondada qoyska milatariga ama taageerada kale ee caadiga ah ee ka timaadda xubin qoys oo maqan ama qof aan la noolayn qoyska.

(vii) lacagaha hawlgabka gaarka ah, lacagaha hawlgabka shaqalaha dawladda, iyo caymiska caadiga ah ama anuwitiga;

(viii) macaashka la qaybsado, dulsaarka, kirada, lacagta ikhtiraaca, ama lacagaha wakhtiga ku xidhan ee hantida ma guurtada ah ama maalgalinaha; iyo

(ix) lacagta khamaarka ama qorituurka.

(b) Dhakhliga kuma jiro kuwa soo socdaa:

(i) macaashka hantida;

(ii) wixii hanti horey laga isticmaali karo ah, oo ay kujiraan lacagaha lagala baxo bangiga ama laga helo iibinta hanti;

(iii) lacagaha cashuur celinta;

(iv) hadiyadaha, daymaha, lacagaha la dhaxlo;

(v) lacag-bixinta caymiska halka-wakhti ama magdhawga dhaawaca halka-wakhti oo kale.

(vi) dheefaha aan lacag caddaan ahayn sida qaybta loo-shaqeeyaha ama ururka shaqaaluhu bixiyo ee caymiska caafimaadka ama dheefaha kale ee shaqaaluhu helo;

(vii) qiimaha cuntada iyo shidaalka la soo saaro laguna isticmaalo beerta iyo qiimaha lacagta laga helo kirada ee beer aanu mulkiiluhu haysan ama guryaha beerta; iyo

(viii) Barnaamijyada aan lacagta caddaanka ah bixin ee fadaraalka, oo ay kujiraan Medicare, Medicaid, Food Stamps, qadada dugsiga, iyo kaalmada guryaynta.

Ogow: In kastoo lacagaha caymiska halka-wakhti laga saaro dakhliga, lacagaha caymiska halka-wakhti ee loo bixiyo ku daboolista adeegyada cusbitaalka ayaa ku xaddidaya helitaanka daryeel bilaash ah biilasha ayna daboolin lacag-bixinta noocan ah. Fiiri baaragaraaf-yaraha IV (B) (1) (b).

(4) **Degganaha Maine.** Tibaaxda "Degganaha Maine" waxa loola jeedaa qof ugu nool gobolka si iskii ah isagoo ku talo jira inuu guri ku yeesho Maine. Qofka booqashada ku jooga ama ku sugan Maine si ku meel gaadh ah ma aha deggane. Caddaynta degganaanshaha oo qayb ka ah hannaanka dalabka ayaa la codsan doonaa.

B. Iska Bixin Kari Waaga Kharashka. Qofka ma awoodo inuu iska bixiyo kharashka adeegyada cusbitaalka markii dakhliga qoyska ee qofkaasi, markii lagu xisaabiyo hababka soo socda midkood, aanu ka badnayn tilmaamaha dakhliga ku habboon ee ku cad qayb-hoosaad C, (haddii hal hab aanu khusayn, ka kale waa in la adeegsado kahor inta aan la gaadhin go'aan mutaysi la'aan ah):

(1) Ku dhufashada afar dakhliga qoyska qofka ee saddexdii bilood ee ka

horreeyey go'aaminta mutaysiga; ama

(2) Isticmaalidda dakhliga qoyska qofka ee dhabta ah ee 12 bilood ee ka horreeyey go'aaminta mutaysiga.

C. Tilmaamaha Dakhliga. Sida ay dhigayaan qawaaniinta Gobolka Maine, cusbitaalada waxa looga baahan yahay inay siiyaan daryeel bilaash ah oo dhammaystiran dadka ah 150% Tilmaamaha Heerka Saboolnimada Fadaraalka (Federal Poverty Guidelines, FPL). MaineHealth waxay aqoonsan tahay inay jirto baahi sharci ah in la siiyo qiime dhimis dheeraad ah dadka dakhligooda sanadkii uu ka badan karo Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka, laakiin kuwaasi oo wali aan lahayn awoodda ay ku bixin karaan kharashka adeegyada. Sidaa darteed, MaineHealth waxay bixin doontaa qiime dhimis Daryeel Bilaash ah oo dheeraad ah sida hoos ku qoran. Tilmaamaha dakhliga soo socda waa in la isticmaalo marka la go'aaminayo haddii qof uuna awoodin inuu kharashka iska bixiyo. Tilmaamahan dakhliga waxbaa laga beddeli doonaa sanad kasta.

MaineHealth waxay isticmaali Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka ee wakhtigan sida ku qoran Diiwaanka Fadaraalka, waxayna siin doontaa Daryeel Bilaash ah oo Dhammaystiran dadka dakhligoodu la mid yahay ama ka yar yahay 175% ee Tilmaamaha Saboolnimada Fadaraalka. Tilmaamaha wakhtigan ee Free Care (Daryeelka Bilaashka ah) Thatee xubinimada MH waxay ku qoran yihiin Lifaaqa 1 ee siyaasaddan. Tilmaamaha dakhliga xubinimada MH waxay dheeraad ku yihiin shuruudaha Waaxda Maine ee Adeegyada Aadanaha.

II. ADEEGYADA LA DABOOLO

Xubnaha MaineHealth waxay siin doonaan daryeel bilaash ah adeegyada bukaan-jiifka iyo bukaan-socodka oo caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. Kaliya daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah ayaa loo bixiyaa Daryeel Bilaash ah ahaan. MaineHealth waxay raaci doontaa Siyaasadaha Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (Center for Medicare and Medicaid Services, CMS), Dib-u-eegista Caafimaadka Deegaanka ama go'aamada Caymiska Qaranka si loo go'aamiyo daruurinimada caafimaad. Daruurinimada Caafimaad sidoo kale waxa go'aamin kara dhakhtarka dalbaya, shirkadda caymiska caafimaadka ee aan dawliga ahayn ee dalbadaha. Barnaamijka Free Care wuxuu dabooli karaa adeegyada kahortag ee daruuriga ah ee bukaan-socodka.

<u>Adeegyada Ka Baxsan/Xaddidan</u>:

1. Free Care Free Care ma daboolo Qalliinka Isqurxinta, qalliinka loo sameeyo ujeedada kaliya ee ah hagaajinta muuqaalka bukaanka (marka laga reebo qalliinka dib-u-hagaajinta).
2. Qalliinka Cayilka Caloosha wuxuu Free Caredaboolaa kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.
3. Wuxuu Free Care daboolaa Qalliinka Ilkaha, oo ah qalliin loo sameeyo ujeedada kaliya ee ah saarista ilko caabuq ama wax kale ku dhaceen, kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku

caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.

4. Free Care ma daboolo qalliimada la xidhiidha dhalmo la'aanta.
5. Free Care wuxuu daboolaa Qalliimada la xidhiidha dhalmo-joojinta kaliya haddii dhakhtarku qoraal ku caddeeyo daruurinimadiisa caafimaad.

III. OGAYSIISKA JIRITAANKA DARYEEL BILAASH AH

A. **Soo Dhejinta Ogaysiis.** Cusbitaalada MaineHealth iyo kooxadaheega dhakhaatiirtu waa inay ku dhejiyaan ogaysiiyo sheegaya jiritaanka Daryeelka Bilaashka goobaha xarunta dhexdeeda kuwaasi oo xubnaha dadwaynaha ay guud ahaan macaamil lkua sameeyaan cusbitaalka ama ay u imaadaan inay helaan ama codsadaan adeegyada cusbitaalka, oo ay kujiraan aagagga aqbalitaanka, qolalka sugitaanka, xafiisyada ganacsiga, iyo aagagga soodhawaynta bukaan-socodka.

B. **Ogaysiiska Shakhsiga ah.** Marka la eego adeegyada bukaan-jiifka, cusbitaalada iyo dhakhaatiirta MaineHealth waa inay bukaanka ka siiyaan ogaysiis qoran jiritaanka Free Care kahor inta aan la saarin. Marka la eego adeegyada bukaan-socodka, cusbitaal kasta waa inuu u raaciyo biilka bukaanka nuqul ogaysiis ah oo sheegaya jiritaanka Free Care ama uu siiyo nuqul ogaysiis ah wakhtiga adeegga la siinayo.

C. Waxa ku yaala Ogaysiiska.
Ogaysiiska la soo dhejiyo iyo kan qoran ee qofka la siiyo waxa laga heli kaaraa Lifaaqa 2 ee siyaasaddan.

D. **Faafinta waxa ku Qoran.** Cusbitaalada iyo dhakhaatiirtu waa inay sameeyaan dadaal macquul ah oo ay ku gaadhsiinayaan waxa ku qoran ogaysiiska qoran dadka la rumaysan yahay inayna awoodin inay akhriyaan ogaysiiska.

IV. GO'AAMINTA U-QALMIDDA

A. Dalabka

(1) MaineHealth waa inay u siiso fursad qof kasta oo raadinaya Free Care si uu dalab ugu sameeyo foomamka ay cusbitaalada MaineHealth bixiyaan.

(2) MMC iyadoo matalaysa MaineHealth waxay uga baahan doontaa dalbadaha inuu keeno wixii macluumaad daruuri u ah caddaynta dakhliga dalbadaha ama xaqiiqda ah in qofku aanu lahayn caymis daboola ama uu mutaystay inay caymiyaan barnaamijyada gobolka ama fadaraalka ee kaalmada caafimaad markii la wado hawsha oggolaanshaha.

a. Fiiri Lifaaqa 3 wixii waraaqo loo baahan yahay ah

(3) Dalbashada Free Care waxa ka hawlgali doona la-taliyayaal dhaqaale ama shaqaalaha Xisaabaadka Bukaanka eek a shaqeeya cusbitaal xubin ka ah ama Xafiiska Ganacsiga Midaysan (Consolidated Business Office, CBO) haddii xubintu ay ku biirtay nidaamka EHR.

B. Go'aaminta

(1) Markii la helo dalab, CBO waa inay go'aamiso in qofka raadinaya Free Care uu u qalmo daryeelkan haddii:

(a) qofku uu buuxiyey tilmaamaha dakhliga ee ku cad Qaybta I;

(b) qofka ayna daboolin wax caymis ah imise uu mutaysanin caymiska barnaamijyada gobolka ama fadaraalka ee kaalmada caafimaad; iyo,

(c) adeegyada la helay ay caafimaad ahaan daruuri ahaayeen.

(2) Haddii CBO ay go'aamiso in qofka raadinaya Free Care uu buuxiyey tilmaamaha dakhliga laakiin uu leeyahay caymis ama ay dabooleen barnaamijyada gobolka ama fadaraalka ee kaalmada caafimaad, waa inay go'aamiso in wixii baaqi ka soo hadha markii caymiyaha ama barnaamijka kaalmada caafimaad uu bixiyey intiisa loo tixgaliyo daryeel bilaash ah.

(3) MaineHealth waxay oggolaani go'aanka u qalmidda adeegyada Free Care ee bukaan-socodka inay sii shaqeeyaan ilaa lix bilood wixii daryeel xaalad gurmad ah ama caafimaad ahaan daruuri ah kadib taariikhda go'aanku soo baxay. Tan waxa kujiri doona dhammaan daymaha maqan oo ay kujiraan kuwa ay gacanta ku hayaan hay'adaha daymaha raagay ilaa la bixiyey lacagta taagan. Isbeddel ku dhaca xaaladda dhaqaale ama soo biirista mutaysiga lacag-bixiye dhinac saddexaad waxay beddeli kartaa muddada oggolaanshaha waxaana loo baahan dib-u-eegis kale.

Go'aan u-qalmidda bukaan-jiifka ee adeegyada Daryeelka Bilaashka waa in la qaato oggolaansho kasta.

C. Dib-u-dhigidda Go'aanka

(1) Marka la eego shuruudaha lagu sheegay baaragaraafyada (2) iyo (3) ee hoose, go'aanka u-qalmidda Free Care waxa dib loo dhigi karaa ilaa 60 maalmood, iyadoo ujeedadu tahay dalbadaha in loo diro inuu keeno caddaynta wakhtigan ee mutaysi la'aanta barnaamijyada kaalmada caafimaad ama inuu xaqiijiyo in adeegyada la sheegayo aanay caymis daboolin.

(2) Haddii dalbade Free Care, kaasi oo buuxiyey tilmaamaha dakhliga ee qaybta I, kaasi oo ayna daboolin kaalmada caafimaad ee barnaamijyada gobolka ama fadaraalka, uu buuxiyo wax kamid ah shuruudaha soo socda, u-qalmida Free Care waa in dib loo dhigo:

(a) da'da 65 jir ama ka wayn;

(b) indho la' (waxba arkayn)

(c) naafo ah;

(d) qofku uu ka tirsan yahay qoys kaasi oo uu jiro ilme aan haysanin taageerada waalidka ama daryeel taasi oo ay ugu wacan tahay sababaha soo socda midkood, oo dakhliga qofkuna uu ka yar yahay tilmaamaha qaybta I:

(i) dhimashada waalidka;

(ii) waalidka oo si joogto ah uga maqan guriga taasi oo ay ugu wacan tahay inuu jeel kujiro, uu si kale meel ugu xanniban yahay, xaalad caafimaad oo dheer ama gaar ah u maqan yahay, loo dhoofiyey waddan shisheeye, furriin dhacay, waalidka oo la kala kaxeeyey, waalidnimo bilaa guur ah;

(iii) waalidka oo naafo ah; ama

(iv) waalidka oo bilaa shaqo ah kaasi oo ah qofka kaliya ee reerka u shaqeeya.

(3) Haddii qofku aanu buuxinin wax kamid ah shuruudaha lagu sheegay (2) ee sare, laakiin cusbitaalku aanu awoodin inuu go'aamiyo caymiska qofka oo uu haysto sabab macquul ah oo uu ku rumaysto in qofka ay dhici karto inuu caymis daboolo ama uu mutaystay barnaamijyada kaalmada caafimaadka fadaraalka ama gobolka, wuxuu cusbitaalka dib u dhigi karaa go'aaminta la xidhiidha Free Care.

D. Waxa ku qoran Go'aanka Dantu ku Jirto.

Go'aanka ah in dalbade uu u qalmo Daryeelka Bilaashka waa inuu muujiyo:

(1) In cusbitaalada MaineHealth ay siin doonaan daryeel bilaash ah ama raqiis ah;

(2) Taariikhda adeegyada la codsaday;

(3) Taariikhda go'aanka la gaadhay; iyo

(4) Taariikhda adeegyada la siiyey ama la siin doono dalbadaha.

(5) Wixii lacag ay hore ugu lahaayeen cusbitaalada MaineHealth ayaa la dhaafi doonaa markii la oggolaado kaalmada dhaqaale.

(6) Adeegyada bukaan-socodka waxa la dabooli muddo lix bilood ah oo ka bilaabanta taariikhda oggolaanshaha.

(7) Bukaanada hela adeegyada Bukaan-jiifka waxa loo baahan doonaa in dib loo dalbado Free Care haddii oggolaanshahoogii hore uu ka badnaa 30 maalmood laga bilaabo aqbalitaanka wakhtigan. Haddii bukaan loo aqbalo bukaan-jiifka ahaan 30 maalmood gudahood laga bilaabo oggolaanshaha Daryeelka Bilaashka ee bukaan-socodka, waxa loo sheegi inay saxeexaan foom marag-fur oo xaqiijinaya inaan dakhligoodu isbeddelin ilaa dalabkoodii hore.

(8) Bukaanada hela adeegyada Bukaan-socodka, kuwaasi oo loo haysto inay qayb ahaan mutaysteen siyaasadda Free Care ama loo diiday Free Care, waxa dhici karta in dib loo qiimeeyo markii la codsado haddii bukaanku uu la kulmay isbeddel dakhli muddadii lixda bilood ahayd ee la daboolay. Bukaanadan oo kale waxa looga baahan doonaa inay dib u dalbadaan sida barnaamijku dhigayo iyagoo wata macluumaadka dakhliga oo wax iska beddeleen.

E. Sababaha u Diididda

CBO-ga MaineHealth waa inay siiyaan dalbade kasta oo codsada Free Care oo loo diiday, dhammaan ama qayb ahaan, bayaan qoran oo taariikhaysan oo sheegaya sababaha diidmada markii diidmada la soo saaro. Markii sababta diidmada lagu saleeyo ku guuldaraysiga ah inuu bukaanku bixiyo macluumaadka loo baahan yahay intii lagu jiray muddada dib-u-dhigidda sida ay dhigayso qayb-hoosaad IV (C), dalbadaha waa in lagu wargeliyo inuu dib u dalban karo Daryeelka Bilaashka, haddii macluumaadka loo baahan yahay uu keeno. Sidoo kale, ogaysiisku waa inuu sheegayo in bukaanku uu xaq u leeyahay in dhagaysi la qabto; sida loo helo dhagaysi; iyo magaca iyo lambaka taleefanka qofka lala xidhiidhayo, haddii bixiyaha/bukaanku uu qabo su'aalo la xidhiidha ogaysiiska.

F. Sababaha Dib-u-dhigidda

(1) Markii dalabka Free Care sida uu dhigayo baaragaraaf IV (C) (2) dib loo dhigo, dalbadaha waa in loo ogaysiiyaa sida soo socota:

Go'aanka Daryeelka Bilaashka wali lama qaadan. Waxa jirta sabab lagu rumaysto in adiga [dalbadaha] aad mutaystay caymiska barnaamijyada gobolka ama fadaraalka ee kaalmada caafimaad. Haddii aad muujin karto inaanad mutaysan caymiska barnaamijyadan 60 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda ogaysiiskan adigoo keenaya waraaq ama bayaan kale oo ka socda _____[gali magaca hay'adda gobolka ama fadaraalka ee dalbadaha loo gudbiyey], markaa kadib waxa laguu tixgalin doonaa inaad u qalanto Free Care. Xiitaa haddii aad mutaysatay caymiska, Free Care waxa loo heli karaa qaybaha biilasha ee barnaamijyada kaalmada caafimaadku (ama caymiska aad leedahay) aanu bixin doonin.

(2) Markii dalab dib loo dhigo sida uu dhigayo baaragaraaf IV (C) (3), dalbadaha waa in loo sheego sababta dib-u-dhigidda, oo ay kujiraan waxa lagu saleeyey waxa cusbitaalku rumaysan yahay ee ah in caymis ama mutaysi uu jiro iyo nooca caddaynta ee ay tahay in la bixiyo si loo dhammaystiro go'aanka. Ogaysiisku waa inuu yahay qaabka lagu cayimay baaragaraafka (1) ee sare waana inuu kujiraa weedha ugu dambaysa ee foomkaas.

V. BIIL DALLACISTA

A. Haddii qofka la go'aamiyo inuu u qalmo 100% Free Care sida uu dhigayo IV (B) (1), qofka waa inaan lagu dallicin biilasha adeegyada loo qabtay.

B. Haddii la go'aamiyo inuu u qalmo 100% Free Care sida uu dhigayo IV (B) (2), qofka waa inaan lagu dallicin lacag kasta oo aanu bixin caymiyuhu ama barnaamijka kaalmada caafimaad.

C. Haddii laguu oggolaaday kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso siyaasaddayadu oo oggolaanshahaaguna aanu daboolayn 100% lacagta adeegyada aanu kuu qabanay, lagugu soo dallici maayo wax dheeraad ah oo daryeelka gurmadka ah ama caafimaad ahaan daruuri ah, marka loo eego xaddiga caadi ahaan lagu dallaco (amount generally billed, AGB) bukaanada caymiska leh. MaineHealth waxay dooratay inay isticmaasho Habka Dib Fiirinta si ay u xisaabiso AGB-ga bukaanada dalbanaya kaalmada dhaqaale. Waxaad ka heli karta macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha AGB, adigoo booqanayo qaybta biilasha ee websaytkayaga. Macluumaadka AGB waxa laga heli karaa halka ka hoosaysa qaybta, Siyaasadaha, Siyaasadda Biilasha & Ururinta Lacagta. Sidoo kale waxaad codsan kartaa nuqul bilaash ah oo siyaaasaddan ah adigoo la xidhiidhaya Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 207-887-5100, ama wicitaanka bilaashka ah (866) 804- 2499.

D. Haddii dalabka qofku ku dalbanayo daryeel bilaash ah dib loo dhigay sida ay

dhigayso qayb-hoosaad IV (C), markaa kadib qofka waxa lagu soo dallici karaa biilasha adeegyada loo qabtay muddada lagu jiro dib-u-dhigidda.

E. Haddii qof la go'aamiyo inuu u qalmo Free Care sida ay dhigayso qayb-hoosaad IV (B) ama haddii go'aanka kusaaban Free Care dib loo dhigay sida ay dhigayso qayb-hoosaad IV (C), markaa waa inaan dawladda deegaanka lagu soo dallicin biil sida uu dhigayo barnaamijka kaalmada guud ee biilka daryeelka oo uu cusbitaalku siiyo qofkaas.

VI. SHEEGISTA IYO HAYNTA DIIWAANKA

A. MMC iyadoo matalaysa MaineHealth waa inay haysaa diiwaanada lacagta Free Care ee la bixiyo iyadoo la raacayo tilmaamaha ugu yar ee ku cad Siyaasaddan iyo inta qof ee la siiyey Free Care. Haddii cusbitaal uu bixiyo daryeel bilaash ah oo ayna dhigaynin Siyaasaddani, waa in cusbitaalku sameeyo diiwaano gooni ah oo ah lacagta daryeelka noocan ah ee la bixiyey iyo inta qof ee la siiyey daryeelkan.

B. Cusbitaal kastaa waa inuu u warbixiyo Waaxda Maine ee Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha (Department of Health and Human Services, DHHS) iyadoo qayb ka ah fayl garayntiisa macluumaadka si iswaafajin kama dambays ah loo sameeyo, guudmarka lacagta Free Care ee lagu bixiyey lacag-bixinta khusaysa; lacagta Free Care ee aan shardiga ahayn laakiin la bixiyey sanadkaas; iyo inta qof ee nooc kasta oo Free Care (shardi ah ama shardi ahayn) la siiyey.

VII. FAYL GARAYNTA; KHUSAYNTA

A. Cusbitaalada MaineHealth waxa looga baahan yahay inay fayl gareeyaan oo ku hayaan DHHS nuqul wakhtigan ah oo ah Siyasaaddeeda Free Care iyo nuqul wakhtigan ah oo ah ogaysiiskeeda la soo dhejiyo ee Free Care.

VIII. OGAYSIISKA JIRITAANKA FURSADDA DHAGAYSI XAQSOOR

A. Sida ay dhigayso 22 M.R.S.A. §1716, DHHS waa inay bixiso fursadda dhagaysi xaqsoor oo la xidhiidha mutaysiga Daryeel Bilaash ah si:

(1) Dalbade kasta oo codsada sababtoo ah waxaa la diiday doonistiisa Free Care ama laguma talaaba qaadin gudaha mudda macquul ah, ama

(2) Cid kasta oo hesha daryeel taasi oo codsatay sababtoo ah waxay rumaysan tahay in cusbitaalku uu tallaabo si qaldan u qaaday.

B. Habraaca Codsashada Dhagaysi Maamuleed

Dalbadaha Free Care wuxuu codsan karaa dhagaysi maamuleed haddii uu ka ashkatoonayo tallaabada loogu diiday codsiga Free Care. Waaxdu waxay ka jawaabi kartaa codsiyada isku daba xiga ee shakhsiyaadka doonaya dhagaysi iyadoo qabanaysa dhagaysi halmar ah. Dalbaduhu waa inuu raaco habraacyada lagu sharxay Qaybtan markii uu DHHS ka codsanayo dhagaysi maamuleed.

(1) Dhagaysi Maamuleed waxa codsan kara dalbade ama wakiilkiisa.

(2) Haddii aan si kale lagu sheegin xeerarkan, dhagaysiyada maamuleed waa in lagu codsado gudaha lixdan (60) maalmood laga bilaabo taariikhda ogaysiiska qoran loo diray dalbadaha ee tallaabada dalbaduhu rabo inuu rafcaanka ka qaato.

(3) Codsiga waa inuu sameeyo dalbaduhu ama wakiilkiisu, isagoo qoraal ah ama hadal ah, si Dhagaysi ay u qabato Administrative Hearings Unit, Department of Health and Human Services, 11 State House Station, Augusta, Maine 04333-0011. Si loo go'aamiyo markii dhagaysi la codsaday, taariikhda codsiga dhagaysi xaqsoor waa inay ahaato taariikhda codsiga dhagaysiga la sameeyey taasi oo loo tixgalinayo taariikhda dhagaysiga la codsaday ahaan. Qaybta Dhagaysiyada Maamuleed sidoo kale waxa dhici karta inay codsato codsiga hadalka ah ee dhagaysi maamuleed in laga daba keeno qoraal, laakiin waxa dhici karta inayna dib u ridin ama diidin codsi iyadoo ku salaynaysa in qoraalka laga daba keenayo aanu soo gaadhin xaggeeda.

(4) Dhagaysiga waxa loo qaban doonaa si waafaqsan Xeerka Habraaca Maamuleed ee Maine, 5 M.R.S.A. §8001 *et seq*. iyo Buug-gacmeedka Dhagaysiga Maamuleed ee Waaxda.

(5) Dhagaysiga waxa lagu qaban doonaa wakhtiga, taariikhda iyo goobta u habboon cusbitaalka iyo dacwoodaha, waxaana la bixin doonaa ogaysiis hordhac ah ugu yaraan labaatan (20) maalmood inta aanu dhagaysiga bilaaban. Muddaynta dhagaysi, waxa dhici kara xaalado uu sarkaalka dhagaysigu ay tahay inuu ka dhigo goobta dhagaysi meel u dhaw dacwoodaha ama taleefan lagu qabto ama lagu qabto Nidaamka Muuqaalka Tooska ah.

(6) Waaxda, cusbitaalka iyo dalbadaha waxa matali kara qareeno marqaatiyana waa iman karaan.

(7) Markii qiimayn caafimaad oo ay sameeyeen hay'ad caafimaad oo aan

ahayn tan ku lugta leh go'aanka laga hadlayo uu ka codsado sarkaalka dhagaysiga, cusbitaalka ama dalbadaha uuna sarkaalka dhagaysigu u tixgaliyo daruuri, waa in la sameeyo iyadoo Waaxdu kharashka bixinaysa, waxaana loo gudbin dalbadaha ama wakiilka dalbadaha, cusbitaalka ama wakiilkiisa, iyo iyadoo sarkaalka dhagaysigu oggolaanayo in dhinacyada oo dhan ra'yi ka dhiibtaan.

(8) Markii dalbadaha ama cusbitaalka ama qofka shaqaalaha ah ee Waaxda codsado dib-u-dhigid, sarkaalka dhagaysigu waxa dhici karta inuu dib u muddeeyo dhagaysiga, kadib markuu ogaysiin siiyo dhinacyada oo dhan.

(9) Go'aamada, ay gaadho hay'adda dhagaysigu, iyadoo u taagan DHHS, wuxuu qaban Waaxda, ilaa ay dhacdo Guddoomiyuhu inuu amro sarkaalka dhagaysiga inuu qaato go'aan soojeedin ah oo uu kaga laabanayo go'aanka kama dambaysta ah taasi oo uga dhigaysa isaga ama iyada oggolaansho.

(10) Qofkii kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka hay'adda dhagaysiga wuxuu xaq u leeyahay dib-u-eegis guddi caddaaladeed sida uu dhigayo Xeerka Maine ee Habraaca Madaniga ah, Xeer 80C.

C. Laalista Codsiyada Dhagaysiyada Maamuleed

Haddii wax kamid ah xaaladaha soo socda jiraan, Xafiiska Dhagaysiyada Maamuleed ayaa laali kara codsiga dhagaysiga maamuleed.

(1) Dacwooduhu wuxuu ka laabtaa codsiga dhagaysiga.

(a) Dacwoodaha, sabab la'aan, wuxuu uga tagi karaa dhagaysiga isaga oon soo xaadirayn.

(b) Arrinka kaliya ee rafcaan laga qaadanayaa waa mid kamid ah sharciga fadaraalka ama gobolka ee u baahan isbeddel otomaatig ah oo si taban u saamaynaya in kamid ah ama dhammaan Free Care ee dalbadaha.

(2) Marka codsiga dalbadaha ee dhagaysiga maamuleed la laalo, Xafiiska Dhagaysiyada Maamuleed waa inuu ogaysiiyo qofka

xaqa uu qofku u leeyahay inuu rafcaan uga qaato go'aankaas Maxkamadda Sare.

D. Tallaabo Sixitaan

Cusbitaalku waa inuu si dhakhso ah u qaado tallaabo sixitaan markii ay habboon tahay, kaasi oo dhaqangalay taariikhda tallaabada qaldan uu cusbitaalku qaaday haddii:

(1) Go'aanka dhagaysigu uu dan u yahay dalbadaha; ama

(2) DHHS go'aamiso inay dalbadaha dan u tahay kahor dhagaysiga.

IX. DAYACNIDA CAAFIMAAD IYO MUTAYSIGA LA FILAN KARO

MaineHealth waxay aqoonsan tahay inay jiri karaan xaalado uu bukaanku aanu u qalmin Free Care sida ay dhigayso siyaasaddani oo aanu haddana wali si sharci ah u awoodin inuu iska bixiyo kharashka adeegyada loo qabto. Sidaas darteed, MaineHealth waxay abuurtay laba qaybood oo dheeraad ah oo tan lagu xallinayo, Caafimaad Ahaan Dayacan iyo Mutaysiga La Filan Karo.

A. Dayacnida Caafimaad

Waxa jira saddex qaybood oo aasaasi ah ee bukaanada Caafimaad Ahaan Dayacan oo Siyaasaddan lagu sheegay. Qaybta koowaad waxa kamid ah bukaanada u qalma Free Care dakhligooda dartii, laakiin kuwaasi oo dhinaca kale aan buuxin shuruudaha Cutubka 150. Tusaalayaasha qaar ee qaybtan waxa kamid ah:

- Bukaanku ma aha mid deggan Maine ama New Hampishire
- Bukaanku waa darbijiif
- Bukaanku wuxuu kujiraa koox la caymin karo laakiin aan bixinin ogaysiiska diidmada ee DHHS ka socda
- Adeegyadu ma aha qaar caafimaad ahaan daruuri ah, laakiin bixiyuhu uu aaminsan yahay inay caafimaad ahaan habboon yihiin.

Qaybta labaad waxa kamid ah bukaanada aan buuxin tilmaamaha mutaysiga Free Care dakhligooda guud dartii, laakiin dakhligooda saafiga ah awood uma siinayo inay kharashka biilasha caafimaadka iska wada bixin karaan.

Labada qaybood ee bukaanada kor ku xusan waxa dib u habayn u oggolaan

doona shaqaalaha kormeerka ama maamulka ee Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ama shaqalaaha CBO u xilsaartay ee ku habboon, markii uu talo ka bixiyo shaqaalaha ururinta lacagta ama adeegga macmiilka. Dhammaystirka Su'aalaha Xogururinta Dhaqaale oo ay la socoto macluumaadka dakhliga iyo kharashka ayaa loo baahan yahay si loo caddeeyo baahida dib-u-habbayn sida qaybtan dhigayso. Tijaabo xagga hantida ah ayaa la adeegsan karaa haddii MaineHealth u qaadato inay habboon tahay.

Qaybta saddexaad ee bukaanada caafimaad ahaan dayacan, kuwa qaybtan kujira waxa kamid noqon kara bukaanada Kansarka ee Gobolka ka Baxsan, waxa loo oggolaan karaa Free Care qaab kiis calaa kiis ah sida ay dhigayso Siyaasaddan sare ku xusan. Bukaanada gobolka ka baxsan ee kaqaybqaadanaya barnaamijka Daryeelka Kansarka una baahan daawada kansarka ee daruuriga ah si loo daaweeyo waxay MaineHealth u tixgalin doonaa Free Care. Oggolaanshan Free Care waxa la galin doonaa nidaamka EHR oo leh taariikho dhaqan iyo dhicitaan si loo hubiyo in bukaanada u qalma Daryeelka Bilaashka ay sidoo kale heli doonaan daawadooda shardiga ah oo lacag la'aan ah.

B. Mutaysiga la Filan Karo

Mutaysiga la filan karo waxa loogu talogalay bukaanada aan waligood buuxin dalabka Free Care, laakiin waaxda Xisaabaha Bukaanku ay ka hayso macluumaad ku filan in la go'aamiyo in bukaanku uu qalmi karo Free Care haddii uu dalbado.

Tusaalayaasha waxa kamid ah kuwa soo socda:

- Iyadoo la isticmaalo softiweerka Healthcare Income Predictor 2.0, go'aami mutaysiga kaalmada dhaqaale oo kusalaysan buundada dakhliga ee la soo celiyey.
- Bukaanku yahay darbijiif, oo aanu buuxin dalab
- Bukaanka uu daboolay qorshaha Medicaid ee gobolka ka baxsan ee bixiyaha aan ruqsad loo siin, iyo baaqiga bukaanku aanu u cudurdaarayn dhammaystirka waraaqaha la rabo in la buuxiyo si ruqsad loogu helo.
- Bukaanku uu xidhan yahay wax hanti ahna aanu lahayn

Si waafaqsan qaybta Dayacnida Caafimaad, bukaanada Mutaysiga la Filan Karo waxa loo oggolaan doonaa dib-u-habbayn oo u sameeynayo shaqaalaha kormeerka ama maamulku Waaxda Xisaabaha Bukaanka.

X: Kaalmada Barnaamijyada Gobolka & Fadaraalka

MaineHealth waxay soosaartay barnaamij ay ku kaalmaynayso bukaanadeeda iyagu kharashka iska bixiya xagga dalbashada barnaamijyada Gobolka iyo Fadaraalka kuwaasi oo ka caawin kara daboolista kharashka cusbitaalka ama adeegyada dhakhtarka. Barnaamijkan waxa kujira booqasho loogu tago dhammaan bukaan-jiifyada kharashka iska bixiya iyo inay xulato bukaan-socodka iyadoo ku salaysan gudbinaha MaineHealth si loo go'aamiyo mutaysigooda barnaamijyada Gobolka iyo/ama Fadaraalka. MaineHealth waxay kaalmayn kartaa hannaanka dalabka dhallaanka dhawaan dhashay iyo inay u qalmaan barnaamijka MaineCare (Medicaid) ee Gobolka Maine.

Bukaanada dalbada Free Care ee ahaa bukaan-jiif MaineHealth ah waxa loo gudbin doonaa DHHS si loo go'aamiyo inay mutaysteen MaineCare (Medicaid). Haddii la go'aamiyo in bukaan aanu u qalmi doonin wax kamid ah kaalmada Gobolka ama Fadaraalka, go'aankaas waxa loo qaadan diidmo DHHS ah, kadibna MaineHealth waxay ka hawlgali dalabka Free Care ee bukaanada.

XI: QORSHAYAASHA MARKETPLACE

Xeerka Daryeelka la Awoodi Karo waxa la socda shardi ah in bukaanadayadu ay leeyihiin caymis daryeelka caafimaadka ah oo ama loo-shaqeeyaha ah, mid gaar ay u iibsadeen ah ama ah dalbashada iyagoo adeegsanaya MarketPlace. MaineHealth waxay leedahay khayraad la heli karo oo aanu kaga kaalmaynayo bukaanadayada hannaanka dalbashada qorshayaasha MarketPlace. Bukaanadu waxay ku booqan karaan la-taliyayaashayada dhaqaalaha ee jooga xerada Bramhall si ay kaalmo uga helaan ama waxay kala xidhiidhi karaan kooxdayada CarePartners si ay kaalmo u helaan 877-626-1684.

Bukaanada dalbada Free Care kuwaasi oo ka ahaa bukaan-jiif Medical Center waxa loo gudbin doonaa DHHS si ay go'aan uga gaadho mutaysigooda MaineCare (Medicaid). Haddii bukaanku uu dhiibi karo nuqul ah Ogaysiiska Mutaysiga MarketPlace ee Caymiska Caafimaadka oo muujinaya inayna mutaysan MaineCare, tan waxaanu u qaadan doonaa diidmada DHHS, shaqaalaha Medical Center-na waxay ka hawlgali dalabka Free Care ee bukaanada.

XII: MACLUUMAADKA XIDHIIDHKA SI LOO HELO KAALMO DHAQAALE

Qofku wuxuu ka dalban karaa Free Care xafiiska La-talinta Dhaqaale ee MaineHealth 662-1949 ama wicitaanka bilaashka ah (800) 619-9715, ama isagoo la xidhiidhaya xafiiska Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka 887-5100 ama wicitaanka bilaashka ah (866) 804-2499. Dalabka Daryeelka Bilaashka iyo siyaasaddan sidoo kale waxa laga heli karaa websaytkayaga ee qaybta biilasha.

Wixii ku saabsan khayraad dhaqaale oo kale, bukaanadu waxay la xidhiidhi karaan Care Partners. CarePartners waxay isku duwdaa bixinta adeegyada daryeelka caafimaadka ee loogu

deeqo degganayaasha saboolka ah ee bilaa caymiska ah ee degmooyinka Maine (Cumberland, Lincoln, Waldo iyo Kennebec). Barnaamijka, oo ah iskaashi ka dhexeeya MaineHealth, dhakhaatiirta, cusbilaatada iyo bixiyayaaha kale ee daryeelka caafimaadka, waxay ka caawiyaan xubnaha bulshada ee aan u qalmin barnaamijyada caymiska daryeelka caafimaadka ee dadwaynaha ama gaarka loo leeyahay inay helaan daryeel caafimaad oo dhammaystiran caafimaad ahaana daruuri ah. Wixii macluumaad dheeraad ah oo la xidhiidha CarePartners fadlan wac taleefanka bilaashka ah 877-626-1684.

XIII: ADEEGYADA DHAKHTARKA EE LAGU DABOOLAY KAALMADA DHAQAALE

Dhammaan adeegyada dhakhaatiirta ee ay bixiyaan dhakhaatiirta MaineHealth ama kooxaha dhakhaatiirta Saaxiibada Caafimaadka Maine waxa lagu dabooli barnaamijka kaalmada dhaqaale.

Qaar kuwa adeegga bixiyaha kamid ah wada shaqayn lama laha MaineHealth waxaana dhici karta inayna aqbalin go'aankayaga kaalmada dhaqaale. Bixiyayaashaas waxa kamid ah kuwa soo socda: Spectrum Medical Group (Suuxinta, Baatoolojiga & Raadhiyoolojiga) dhakhaatiirta InterMed iyo kooxaha dhakhaatiirta kale ee gaarka ah.

DIB-U-EEGIS: Guddida Siyaasadda Hay'adeed: _____

Agaasimaha Masuulka ka ah: _____Taariikhda: _____
Agaasimaha Guud ee CBO

Oggolaanshaha VP/AVP _____Taariikhda: _
Wareegga Dakhliga ee VP

Lifaaqa 1

Tilmaamaha Free Care ee MaineHealth ee 2018		
	Shuruudaha Cutubka 150 ee Maine DHHS	
Dadka Qoyska ka Tirsan	**150% FPL**	**175% FPL**
1	$18,210	$21,245
2	$24,690	$28,805
3	$31,170	$36,365
4	$37,650	$43,925
5	$44,130	$51,485
6	$50,610	$59,045
7	$57,090	$66,605
8	$63,570	$74,165
Qof kasta oo dheeraad ah, ku dar	$6,480	$7,560
Qiime Dhimista la Adeegsaday:	100%	100%

OGEYSIINTA
DARYEELKA CAAFIMAAD EE DADKA AAN KHARASHKA ISKA BIXIN KARIN

Sharciga Maine wuxuu dhigayaa in daryeelka caafimaadka oo bilaash ah la siiyo dadka reer Maine ee dakhligoodu ka hooseeyo 150% ee heerka saboolnimada fadaraalka. Hase yeeshee, MaineHealth waxay siisaa Free Care dadka Maine ee ah 175% ee heerka saboolnimada.

Tilmaamaha Free Care ee MaineHealth ee 2018		
…	**Shuruudaha Cutubka 150 ee Maine DHHS**	
Dadka Qoyska ka Tirsan	**150% FPL**	**175% FPL**
1	$18,210	$21,245
2	$24,690	$28,805
3	$31,170	$36,365
4	$37,650	$43,925
5	$44,130	$51,485
6	$50,610	$59,045
7	$57,090	$66,605
8	$63,570	$74,165
Qof kasta oo dheeraad ah, ku dar	$6,480	$7,560
Qiime Dhimista la Adeegsaday:	100%	100%

Waxaa lagu weydiisan doonaa haddii aad leedahay caymiska ee nooc walba inuu kaa caawiyo lacag bixinta daryeelkaaga. Waxaa sidoo kale lagu weydiisan karaa inaad tustid in caymiska ama barnaamijka dowlada aysan bixineyn daryeelkaaga.

<u>Kharashku Ma Dhaafeyo Tirada Guud ahaan lagu Dallaco Medicare</u>
Haddii laguu oggolaaday kaalmada dhaqaale sida ay dhigayso siyaasaddayadu oo oggolaanshahaaguna aanu daboolayn 100% lacagta adeegyada aanu kuu qabanay, lagugu soo dallici maayo wax dheeraad ah oo loogu talagalay daryeelka gurmadka ah ama daryeelada kale ee caafimaad ahaan daruuriga ah, marka loo eego xaddiga caadi ahaan lagu dallaco bukaanada caymiska leh.

Kaliya daryeelka caafimaadka muhiimka ah ayaa loo bixiyaa sida daryeel bilaash.
Haddii aadan u qalmin daryeelka caafimaadka oo bilaash ah, waxaad codsan kartaa dhagaysi xaqsoor. Waxaan kuu sheegi doonaa sida loo codsado dhagaysiga xaqsoorka ah.